

## Wax kasta ood rabtid in aad ka ogaatid isu diwaangelinta doorashada.

Waa in aad diiwaangashan tahay si aad uga qayb qaadatid doorooshada Baarlamaanka New Zealand. Haddii aad xog dheeraad ah u baahan tahay waxaad wacdaa telefoonkan 0800 ENROL NOW, (0800 36 76 56) ama waxaad booqataa bogga internetka [www.elections.org.nz](http://www.elections.org.nz).

Saddexdii sanoba mar, New Zealand waxaa laga qabtaa doorashooyinka guud ee lagu dooranaayo mudaneyaasha Baarlamaanka iyo xukuumadda. Nadaamka doorashada ee MPP (mixed member proportional) wuxuu qofwaliba oo u diiwaangashan cod-ridashada doorashooyinka u oggolaanayaa inuu laba cod dhiibto. Hal cod waxaa loogu ridaa xisbiga siyaasiga ee uu qofku doonaayo. Codka kale waxaa loogu ridaa mudanaha aad dooneysid in uu helo kursiga baarlamaanka ee xaafaddada.

Degmada aad doorashada ka geleysid waxay ku xiran tahay cinwaanka meesha aad degantahay (gashid). Laba siyaabood ayaa codka loo ritaa. Mid waa midka guud, midna waa midka kuraasta Maoriga u gaarka ah. Degaan kasta ee doorashadu ka dhacdo wuxuu leeyahay liisto ama diwaan uu ku qoran yahay qof kasta oo isdiiwaangeliyey cod-ridashada doorashada. Haddii aad 18 jir tahay ama aad ka da'a weyntahay, xaqna aad u leedahay in aad isdiiwaangelisid, sharcigu wuxuu dhigaayaa in liiska aad ku jirtid amaba aad diiwaangashantahay. Haddii aad 17 jir tahay si ku meelgaar ah ayaad isu-diiwaangelin kartaa. Mar haddii aad is-diiwaangelisid, waa in aad tafaasiirtaada aad cusboneysid markasta oo ay lagamamaarman noqoto. Diiwaankaas waxaa gacanta ku haya Diiwanhayayaasha cod-ridashada kuwaas oo u shaqeeya shirkadda boostada New Zealand.

## Tusmo

Hordhac	2	Maxaa loo isticmaalaa macluumaadka qofka ee ku yaala liiska cod-ridashada?	6
<b>Isu-diiwaangelinta cod-ridashada</b>	<b>2</b>	<b>Cusbooneysiinta tafaasiirtada cod-ridashada</b>	<b>6</b>
Xaq miyaan u leeyahay in aan isdiiwaangeliyo?	2	Maxaan yeelaa haddii aan beddelo cinwaanka meesha aan degantahay?	6
Waa maxay sababta aan isu-diiwaangeliyaayo?	2	Maxaan yeelaa haddii aan magacayga ama xirfaddeyda shaqo aan bedelo?	7
Sideen isu-diiwaangeliyaa?	2	Maxaa dhacaaya haddii aan iloobo in aan cusboneysiyo tafaasiirteyda?	7
Halkeen ka helaa foomka la isku diiwaangeliyo?	2	<b>Ololaha baraarujinta isdiiwaangelinta</b>	<b>7</b>
Ma iska diiwaangelin karaa internetka, mase ka cusbooneysiin karaa tafaasiirteyda?	3	Waa maxay ololaha baraarujinta isdiiwaangelinta?	7
Ma isdiiwaangelin karaa haddii aanan 18 sano gaadhin?	3	Maxaan yeelaa marka uu socdo ololaha lagu baraarujinaayo cod-rideyaasha?	7
Waxaan ahay naafo (qof-dhiman) – Ma la iga caawin karaa isdiiwaangelinta?	3	Maxaa dhacaya haddii aanan dib idinku soo boosteyn foomka cusbooneysiinta tafaasiirta?	8
<b>Xigtadeyda ama asxaabteyda ayaa dibedda (dal kale) ku maqan. Ma diiwaangelin karaa?</b>	<b>3</b>	Ka warran haddii cinwaankeyga aan ka helo foom uu qof cinwanka deganaan jirey uu leeyahay?	8
Waa maxay liistada cod-ridashada ee aan la daabicin (unpublished)?	4	Ka warran haddii aanan helin foomka cusboneysiinta tafaasiirta?	8
Maxaa lagu sameynayaa foomka aan isku diiwaangeliyo marka aan idiin soo celiyo?	4	<b>Xadka degaamada Kuraasta baarlamaanka</b>	<b>8</b>
Waa maxay tafaasiirta la iiga baahan yahay	4	Maanan guurin waxaana laygu qoray kursi ka duwan kaan ka cod-ridan jirey. Waayo?	8
<b>Isdiiwaangelinta Maori ahaan</b>	<b>Error! Bookmark not defined.</b>	<b>Doorashooyinka kale</b>	<b>8</b>
Fursadda kuraasta Maoriga (Maori Electoral Option)?	5	Waa maxay (Parliamentary by-election) doorashada baarlamaanka ee gaarka ah?	8
Waxaan ahay New Zealand Maori. Sideen ukala doortaa labada fursad ee aan u leeyahay cod-ridashada?	5	Waa maxay doorashada dawladda hoose?	8
Ka warran haddii aan ahay Maori markii ugu horeysey isdiiwaangelineya?	5	Xaq miyaan u leeyahay inaan ka cod-bixiyo afti dawladda ama shaqsi soo bandhigey (referendum)?	8
Intee goor ayaa sida badan la qabtaa fursadda cod-ridashada Maoriga?	6	<b>Warrar dheerad ah</b>	<b>9</b>
Waxaan ahay Bolineeshiyaan asalkiisu kasoo jeedo Jasiiradaha Baasifiga. Ma ka ridan karaa codkeyga kuraasta Maoriga?	6	Wararkan ma heli karaa ayaga oo ku qoran luqado kale?	9
<b>Liistada Cod-bixinta</b>	<b>6</b>		
Waa maxay liiska cod-bixinta Baarlamaanka?	6		
Halkee ayaan ka heli karaa liiska cod-bixinta	6		

## Hordhac

### *Isu-diiwaangelinta cod-ridashada*

#### **Xaq miyaan u leeyahay in aan isdiiwaangeliyo?**

Xaq ayaad uleedahay, sharciyana waa in aad isdiiwaangelisid haddii:

- Aad tahay waddani New Zealand ah ama aad haysatid sharci deganaansho ah,
- Aad 18 jir tahay ama aad ka d'a weyntahay,
- Aad ku nooleyd New Zealand si joogta ah in ka badan hal sano, iyo,
- Aan lagaa mamnuucin.

Miyaa layga mamnuuci karaa in aan isdiiwaangeliyo?

Waa lagaa mamnuuci karaa in aad isdiiwaangelisid haddii:

- Aad tahay waddani New Zealand oo ku nool dalka dibeddiisa ama waddanka aadan iman 3dii sanno ee ugu dambeysey.
- Aad tahay qof deganaansho haysta, hase yeeshee dalka dibeddiisa degan, isla markaasna aadan iman dalka 12kii bilood ee ugu dambeeyey.

(Digniin: Labada xeer ee kaa mamnuucaaya isu-diwaangelinta cod-ridashada, waxaa ka sii reeban shaqaalaha dawladda iyo ciidamada dalka debiddiisa jira iyo xaasaskooda).

Waxaa jira siyaabo kale oo qofka looga reebi karo inuu isu-diiwangeliyo cod-ridashada, taas oo dad yar uun khuseeysa. Registarka (Diwaanahayaasha) liiska cod-ridashada ayaa lagu wargeliyaa dadka siyaabaha kala duwan looga mamnuucey in ay isu-diiwaangeliyaan cod-ridashada. Haddii aad su'aalo ka qabtid arrintaas amase aad ka welweleysid waxaad wacda telefonka ah 0800 ENROL NOW (0800 36 76 56) ama booqo bogga internetka ee – [www.elections.org.nz](http://www.elections.org.nz).

#### **Waa maxay sababta aan isu-diiwaangelinaayo?**

Waa waajib in aad isdiiwaangelisid haddii aad xaq uleedahay. Isdiiwaangelintu waxay fursad kuu siineysaa in aad codkaaga ridatid. Cod-ridashadu waa fursad aad u leedahay in aad wax ka tiraahdid cidda iyo xisbiyada siyaasadeed ee ku loolameya kuraasta si ay uga mid noqdan Barlamaanka New Zealand marka doorashada guud la qabanaayo. Waxaa kale oo aad fursad u heleysaa in aad codka ka ridatid doorashooyinka dawladda hoose iyo guddiyada caafimaadka degmooyinka iyo waliba in aad codkaaga ka dhiibatid aftida iyo ra'iyada (Referenda and polls).

#### **Sideen isu-diwaangeliyaa?**

Waxaad buuxisaa foomka isdiiwaangelinta ee la yiraahdo “isu-diwaangelinta cod-ridashada (“Enrolling to vote: Application”). Waa in aad codsatid in lagaa diiwaangeliyo liiska cod-ridashada degaankaaga xitaa haddii aadan codkaaga ridaneyn.

Haddii aad tahay New Zealand Maori, ama aad tahay qof ku abtirsada New Zealand Maori, isla markaasna ay tahay markii kuugu horeysey in aad isdiiwaangelisid, foomka waxaa kale oo aad u isticmaali kartaa in aad kala xulatid liistada aad ka cod-ridaneysid ta ay tahay. Waxaad kala dooraneysaa in aad ka cod-ridatid liistada u gaarka ah kuraasta Maoriga ama tan kale ee guud.

#### **Halkeen ka helaa foomka la isku-diiwaangeliyo?**

- Buuxi, oo inoo soo dir kubonka (coupon) qoraalkan meesha ugu dambeysa kaga yaala, waxaan kuu soo diriddoonaa foomka isdiiwaangelinta cod-ridashada.
- Sidaas oo kale foomamka oo bilaash ah waxay yaaliindukaamada boostada (PostShop).
- Ama nagala soo hadal telefoonka bilaashka ah ee 0800 ENROL NOW (0800 36 76 56), waxaana ku soo diridoona foomka.

- Ka soo codso foomka boggeena intarnetka [www.elections.org.nz](http://www.elections.org.nz) ama halkaasba kadaabaco.

Marka aad foomka buux-buuxisid waxaad geysaa dukaanka boostada (PostShop) ama boostada inoo soo dhig (tiimbare lagaagama baahna) cinwaanka hoos ku yaala:

Freepost 2 Enrol  
Electoral Enrolment Centre  
P O Box 190  
Wellington 6015

### **Ma iska-diiwaangelin karaa intarnetka, mase ka cusbooneysiin karaa tafaasiirteyda?**

Haa, waxaad booqataa bogga intarnetka – [www.elections.org.nz](http://www.elections.org.nz) – waxaadna gujisaa meesha leh “hubi tafaasiirtaada cod-ridashada ama iska diiwaangeli intarnetka”. Raac talaabooyinka lagu faro si aad tafaasiirtaada u buux-buuxisid. Dabeetana waxaad daabacdaa foomka isaga oo leh dhamaan tafaasiirta lagaa rabo. Dabeetana, inoo soo dir ka dib marka aad saxiixdid si boroseeska kuugu dhamaado.

Ama waxaa isla intarnetka noogu soo diri karta foomka aad buux-buuxisey, waxaana kuu soo direynaa foomka oo buux-buuxsan, marka aad xaqiijisid tafaasiirta ku yaala halkaas in ay sax yihiin, waad saxiixeysaa dib ayaadna noogu soo celineysaa. Waxaad kale oo aad yeeli kartaa in intarnetka aad ka daawatid tafaasiirtaada cod-ridashada.

### **Ma isdiiwaangelini karaa haddii aanan 18 sano gaadhin?**

Haa, marka aad 17 jirsatid waxaad isdiiwaangelin kartaa si ku meel gaar ah. Sanadka dambe marka aad 18 jirsatid si toos ah ayaa lagu diiwaangelineyaa.

Warar dheerad ah oo ku saabsan mawduucan waxaad ka heleysaa buugga la yiraahdo isdiiwaangelinta cod-ridashada inta aadan 18 jirsan (“Enrolling to vote before you’re 18”). Waxaa laga helaa dukaamada boostada (PostShop) ama waxaad wacdaa telefoonkan 0800 ENROL NOW (0800 36 76 56) si buugga laguugu soo diro.

### **Waxaan ahay curyaan (qof-naafo ah) – Ma la iga caawini karaa isdiiwaangelinta?**

Haddii aad tahay qof naafo ah oo aad u baahantahay in lagaa caawiyo buux-buuxunta foomka cod-ridashada, waxaad yeeleysaa sidatan:

- Waxaad yeeli kartaa in aad ka codsatid qof udiwaangashan cod-ridashada oo ku jira diiwaanka in uu foomka kuu buux-buuxiyo. Waa in foomka ay ku qoraan si la akhirsan karo meesha ku xigta saxeexooda ereyada ah “codbixiye naafo ah- waxaana ku saxeexey idankooda” (“Elector Physically Disabled – signed by their direction”).
- Ama waxaa foomka kuu buuxin kara kuuna saxiixi kara qof aad wakaalad sharci ah siisey (Power of Attorney). Waa in si la akhrin karo saxiixooda aktiisa ay ku qoraan ereyada ah “Cod-rite naafo ah waxaan haystaa wakaalad sharci ah” oo ingriisi ah. (“Elector Physically Disabled – Power of Attorney”).

Haddii qof ehelkaaga ah oo maskaxda wax uga dhimanyihiin aanu karin inuu isdiiwaangeliyo waxaa la oggolyahay inaad adigu u-buuxiso foomka. Bilaash nagu soo wac telefonka 0800 ENROL NOW (0800 36 76 56) si aad u hesho tafaasiir dheeraad ah.

### **Dadkeyga ama asxaabteyda ayaa dibedda (dal kale) ku maqan. Ma diiwaangelin karaa?**

Haa. Haddii aaney ka reebaneyn isdiiwaangelinta, waad u buux-buuxin kartaa foomka isdiiwaangelinta. Sidan ayaad yeeleysaa:

- Haddii aad u diiwaangashan tahay cod-ridashada oo aad ku jirtid liistada cod-rideyasha foomka waad u buux-buuxin kartaa waadna saxiixeysaa. Waa in si la akhrin karo, saxiixaaga aktiisa aad ku qortaa ereyda ah “cod-rite dibedda jira, waxaan ku saxiixeyaa sida ay ifareen” oo ingiriisi ah (“Elector Overseas – signed by their direction”).

- Ama haddii si sharciyan ah lagu wakkiishey ( Power of Attorney) foomka waad u buux-buuxin kartaa waxaadna saxiixaaga agtiisa ku qoreysaa si la akhirin karo ereyada ah “Cod-rite dibedd jira- wakaalad sharciyeysan ayaan u leeyahay” oo ingriisi ah (“Elector Overseas – Power of Attorney”).

### **Waa maxay liistada cod-ridashada ee aan la daabacin (unpublished)?**

Haddii aad aaminsanatahay in tafaasiirtaada ku qoran liistada cod-ridashada ee la daabaco ay naftaada halis gelineyso, waxaad xaq u leedahay in aad codsatid in aan tafaasiirtaada lagu daabacin liistada cod-ridashada. Waxaad u baahan tahay in aad codsi gaar ah sameysatid, isla markana aad markhaati keentid ku saabsan xaaladdaada. Markhaatiga la oggolyahay waxaa ka mid ah amar lagugu ilaalinaayo (protection order), amar xakameyn ah (restraining order), ama markhaati ku saleysan sharciga oo uu qof ka tirsan booliska ku qorey (statutory declaration from a member of the Police).

Xog dheeraad ah iyo foomka codsiga waxaad ka heli kartaa buuggayaga magaciisu yahay “Waxkasta ood rabtid in aad ka ogaatid liiska aan la daabacin ee cod-ridashada ( “Everything you need to know about the unpublished electoral roll”). Waxaa laga helaa Boostada (PostShop) ama waxaad wacdaa telefoonka 0800 ENROL NOW (0800 36 76 56) si aan kuugu soo dirno buugga.

### **Maxaa lagu sameynayaa foomka aan isku diiwaangeliyo marka aan idiin soo celiyo?**

Diiwaanhayaha degaanka aad ka tirsan tahay masuulka ka ah ayaa hubineya in tafaasiirtaada si hagaagsan loo geliyey diiwaanka. Marka ay sidaas yeelan waxaa magacaaga lagu daabacayaa liiska cod-ridashada xaafadda aad markii kuugu dambeysey aad deganeyd ilaa in muddo bil ah. Waxaana boostada lagu soo dhigeyaa waraaq caddeyneysa in lagu diiwaangeliyey.

### **Waa maxay macluumaadka la iiga baahan yahay**

Fadlan si sax ah uga jawaab dhamaan su'aalaha ku yaala foomka isdiiwangelinta si loo sugo in si saxan lagu diiwaangeliyo. Waxaa keliya oo lagu daabiciddoona liiska cod-ridashada su'aalaha leh calaamadda noocan ah \* .

#### **\*MAGACAAGA OO BUUXA:**

Tan waxay hubineysaa in si saxan lagu diiwaangeliyey, waxayna kala saareysaa dadka magacyadoodu isu dhow-dhow yihiin ama isku midka yihiin.

#### **TAARIKHDA DHALASHADA:**

Tan waxay diiwaanhayaha u cadeyneysaa in aad jirtid da'da la rabo, waxaa kale ay kala saareysaa labada qof ee isku magaca wata.

#### **SAXIIXA IYO TAARIKHDA LA SAXIIXEY:**

Haddii aad tahay New Zealand Maori, ama aad ku abtirsatid New Zealand Maori, WAA IN AAD saxiixdaa taariikhdana ku dhigtaa labada meelood midkood oo qura. Meesha Maoriga AMA meesha dadweynaha kale. MARNA HA SAXIIXIN LABADOODABA. Waxaa muhim ah in aad si taxader leh uga fikirto labada siyaabood midka aad dooneysid in aad ku cod-ridatid. Dhamaan dadka intooda kale waa in ay saxiixaan, taariikhdana ku qoraan meesha guudahaan dadweynaha loo calaamadeeyey. Haddii aad naafo tahay ama aad debedda ku maqantahay waa in meeshaas lagu saxiixaa.

#### **\*CINWAANKA MEESHA AAD DEGANTAHAY:**

Kani waa cinwaanka guriga aad ku jirtid. Cinwaanka sanduuqa boostada ee New Zealand ama sanduuqa reer miyiga loogu geeyo waraaqaha maaha waxyaabaha loo aqoonsanyahay cinwaanka loo isticmaalo diiwaangelinta cod-ridashada. Waxaa loobaahan yahay cinwaankaaga buuxa ee ‘guriga aad gashid’ si laguugu qoro xaafadda aad ka cod-ridaneysid.

Waxaad deggan tahay guriga reerkaagu ku nool yihiin, ama xiriir aad ku leedahay ama

hooy kuu ah ama sikaleba aad ugu xirantahay. Kama dhigna in aadan deganeyn meesha mar haddii aad ka yara tagtid ama aad muddo ka maqantahay mararka qaarkood. Ka maqnaanshaha gurigaaga shaqo (ama waxbarasho awgeed ama shaqo ama waxbarasho xaaskaaga uga maqan tahay) wax ka bedelimeyso degaankaaga. Sheyga ugu muhimsan marka aad dooraneysid meesha aad degantahay waxay ku xirantahay halka aad leedahay waa aqalkeyga.

**SANDUUQA BOOSTADA:**

Kan waxaa loo baahan yahay haddii uu ka duwan yahay kan cinwaanka gurigaaga. Waxaa kan looga baahan yahay in laguugu soo diro waraaqda caddeyneysa in lagu diiwaangeliney.

**\*XIRFADDAADA**

Tan waxay naga caawisaa si aan u kala saarno haddii laba qof ay isku magac yihiin. Aalaba waxaa la soo daabacaa iyada oo la soo gaabshey.

**MAORI MA TAHAY?**

Waxaa keliya oo loo oggoolayahay in ay calaamadiyaan halka uu ku yaal erayga HAA (“YES”) dadka u dhashey New Zealand Maori, ama ku abtirsada New Zealand Maori. Dadka intooda kale waa in ay calaamadiyaan meesha ay ku qorantahay MAYA (“NO”).

**LAMBARADA TELEFOONKA:**

Kan waxaan ugu baahanahay haddii loo baahdo in lagu soo waco.

**QARIIDAD GACAN KU QOR AH (SKETCH MAP):**

Haddii aad degantahay guri aan lambar lahayn (cinwaan aan lahayn), waxaa lagaaga baahan yahay qariidad gacan ku qoran oo tilmaameysa meesha aad degantahay si loo hubiyo degaanka aad ka cod-ridaneysid.

**DHOWAAN MA BEDESHEY CINWAANKAAGA?**

Hadii aad ku nooshahay cinwaan cusub in ka yar hal bil, fadlan halkan buuxi.

**NEW ZEALANDER KU NOOL DIBEDDA:**

Halkan buuxi haddii aad dibedda ku maqantahay. Si la akhrin karo ugu qor halkan markii wadanka (New Zealand), kuugu dambeysey iyo cinwaanka (meesha) aad ku nooleyd wakhtigaas ugu yaraan hal bil intaadan dalka ka dhoofin.

## ***Diiwaangelinta doorashada Maoriga***

### **Maori Electoral Option(Fursadda gaarka ah ee codbixinta Maoriga)?**

Haddii aad tahay New Zealand Maori, ama aad ku abtirsatid New Zealand Maori, waxaa u door leedahay in aad iska diiwaangelisid diiwaanka guud ee dadweynaha ama kan Maoriga u gaarka ah.

### **Waxaan ahay New Zealand Maori. Sideen u kala doortaa meesha aan ka cod-ridanayo?**

5tii sannadoodba waxaa mar loo diraa foomamka isdiwaangelinta cod-ridashada Maoriga qofkasta oo ku yiil liistada hore oo ay u qorneyd inuu ahaa Maori ama Maori ku abtirsado. Foomkaas ayaa loo isticmaalaa in qofku Maoriga ah uu ku kala doorto in uu codkiisa ka dhiibto liiska Maoriga ama midka guud. Fursaddaan waxaa la yiraahdaa fursadda codbixinta Maoriga (Maori Electoral Option).

### **Ka warran haddii aan ahay Maori markii ugu horeysey isdiiwaangelineya?**

Waxaad ku caddeyn kartaa halka aad jeceshahay in aad ka cod-ridatid, haddii aad tahay New Zealand Maori adoo saxiixaya halka ku habboon ee ku qoran foomka cosdsiga isu-diiwaangelinta cod-ridashada. Mar haddii aad dooratid labadooda midkood ma bedeli kartid ilaa iyo inta laga gaareyo marka xigta ee fursadda codbixinta ee Maoriga u gaarka ah (Maori Electoral Option}.

## **Immisa goor ayaa badanaa qabtaa fursadda cod-ridashada Maorida?**

Fursadda cod-ridashada Maoriga (Maori Electoral Option) waxaa aalaba la qabtaa 5tii sanoba mar, taas oo socota afar bilood.

Waxay tan fursad usiisaa Maoriga in ay ka baaraandegaan halka ay doonayaan in ay ka cod-ritaan.

## **Waxaan ahay Bolineeshiyan asalkiisu kasoo jeedo Jasiiradaha Baasifiga (Pacific Islands Polynesian). Meesha Maoriga maka cod-ridan karaa?**

Maya. Waxaa keliya loo oggol yahay qofka ah New Zealand Maori ama ku abtirsada New Zealand Maori. Maoriga Cook Islands ama kuwa Pacific Islanders ee loo oggolyahay in ay isdiiwaangeliyaan waxay ka cod-ridanayaan meesha guud ee dadweynaha.

Warbixin dheeraad ah waxaad ka heleysaa buugga la yiraado “Enrolling to vote as a New Zealand Maori”.

## **Liistada Cod-ridashada**

### **Waa maxay liiska cod-ridashada Baarlamanka?**

Liisku waa buug ay kuyaaliin dhamaan dadka gaadhey da’da cod-ridashada ee isdiwangeliyey. Liisku wuxuu ka kooban yahay magacayada dadka, cinwaanka ay degan yihin iyo xirfaddooda shaqo. Qofkii doonaba xaq ayuu u leeyahay inuu arko/akhiriyo buugga. Buugaas waxaa la cusboneysiisaa (la daabacaa) sannad waliba marka laga reebo sanandka la qabto doorashooyinka baarlamanka. Sanaddadaas, waxaa la daabacaa laba koobi, mid wuxuu u furanyahay dadka in ay iska eegaan si ay u hubiyaan in tafaasiirtooda si sugan ugu xusantahay liiska, koobiga kale waxaa la istimaalaa maalinta doorashada la gelaayo.

## **Halkee ayaan ka heli karaa liiska cod-ridashada**

Midkasta oo ka mid ah Diwaanhayayaasha xafiiska doorashada ee xaafadda codka aad ku leedahay iyo maktabadaha dadweynaha oo haya liiska dhamaan dadka New Zealand. Boostada waxaa laga helaa liiska Maoriga iyo liiska dadka intiisa kale. Boostooyinka waaweyn waxaa kale oo ay hayaan liiska cod-ridashada xaafadaha ku dhowdhow.

Waxaa kale oo aad tafaasiirtaada ka baari kartaa booggeena intarnetka [www.elections.org.nz](http://www.elections.org.nz).

## **Maxaa loo isticmaala tafaasiirta qofka ee ku taala liiska cod-ridashada?**

Ka dib marka aad is-diiwangelisid, waxaa liistada cod-ridashada lagu soo daabacayaa magacaaga, cinwaanka aad degan tahay iyo xirfaddaada shaqo. Dokumentigan wuxuu u fasaxan yahay qofkasta oo dooneya in uu arko. Macluumaadkaan iyo tafaasiirta ku saabsan da’daada, cinwaanka sanduuqa boostadada, in aad Maori tahay(haddii aad Maori tahay) waxaa la siin karaa cilmibaarayaasha caafimaadka ama sayniska, musharixiinta, mudaneyaasha baarlamanka iyo xisbiyada siyaasadda. Waxaa kaloo tafaasiirtaas la siiyaa dawladda hoose si ay ugu isticmaalaan doorashooyinkooda iyo doorashada guddiyada caafimaadka, aftida guud iyo ra’iyi diibashada (referendum and polls). Liistada xeerbeegtida dadka loogu yeero (jury) waxaa lagala soo baxaa tafaasiirta lagu hayo diwaanka cod-ridashada.

## **Cusbooneysiinta tafaasiirtaada cod-ridashada**

### **Maxaan yeelaa haddii aan beddelo cinwaanka meesha aan deganahay?**

Inta aadan guurin, waxaad buuxisaa foomka boostada (New Zealand Post) ee la yiraahdo (“Mail rolls Re-direction Request”), taas oo loogu talagaley in waraaqahaaga laaguugu

soo hagaajiyo cinwaanka cusub ee aad degtey, isla markaana waxaa la ogeysiinayaa diiwaanhayaha guud ee liiska cod-ridashada in aad guurtey.

Haddii degankaaga cusub uu yahay isla xaafadda aad ka cod-ridatid, diiwaanhayahu wuxuu cusbooneysiinayaa tafaasiirtaada wuxuuna kuu soo direyaa ogeysiin in uu la socdo cinwaankaaga cusub.

Haddiise aad u guurtey meel ka baxsan xadka aad ka cod-ridan jirtey, waxaa lagu soo diraayaa foom buuxsan oo kuu gaar ah, taas oo laga rabo in aad xaqiijisid tafaasiirta ku qoran dabeetana aad saxiixdid oo aad u dirtid xafiiska doorashooyinka. Diiwaanhayaha degaankaaga cusub marka uu helo foomka aad ku soo celisey wuxuu kuu soo dirayaa ogeysiin in uu heley foomkaaga oo uu ku diiwaangeliyey.

Haddii diwanhayaha cod-ridashada uu ka waayo magacaaga liiska cod-ridashada wuxuu u direyaa foomka isdiiwangelinta cinwaankaaga cusub.

Waxaa kale oo aad yeli kartaa in aad booqatid bogga intarnetka ee – [www.elections.org.nz](http://www.elections.org.nz) – si aad u saxdid cinwaankaaga.

### **Maxaan yeelaa haddii aan magacayga ama xirfaddeyda shaqo aan bedelo?**

Haddii aad magacaaga ama xirfadadda shaqo aad bedeshid waxaa laga rabaa in aad qoraal ku ogeysiisid Diwaan-hayaha isbeddelkaas si dhaqso leh. Haddii kale waxaad yeeli kartaa in aad buuxbuuxisid foom cusub ama aad booqatid bogga intarnetka [www.elections.org.nz](http://www.elections.org.nz) si aad tafaasiirtaas u beddeshid.

### **Maxaa dhacaaya haddii aan iloobo in aan cusbooneysiyo tafaasiirteyda?**

Haddii aad illowdid in aad tafaasiirtaada cusbooneysid waxaa suurtoowda inaan kula soo xiriiri weyno marka uu socdo ololaha baraarujinta isu-diiwaangelinta codbixinta, waxaana dhacaysa in aan kaa saarno liiska

cod-ridashada. Waxaad markaas u baahantahay inaad si horleh isudiiwaangelisid.

### ***Ololaha baraarujinta isdiiwaangelinta***

#### **Waa maxcay ololaha baraarujinta isdiiwaangelinta?**

Sannad waliba kumaankun New Zealander ayaa noloshoodu isbeddeshaa. Way guuraan, way guursadaan, xirfaddooda ayey beddelaan. Qaar kale oo fara badan waxay ka soo noqdaan dibedaha. Mararka qaar kood isbeddelkan ma ogeysiyaan diiwaanhayaha codbixiyeyaasha.

Taas ayaa keentey inaan si joogta ah u qaadno olole baraarujin markii muddo laga joogoba. Qof waliba waa in uu hubiyaa, isla markaasna cusbooneysiya tafaasiirtiisa si uu diiwaanhayuhu u geliyo isbeddeladaas liiska cusub ee codbixinta xilliga doorashada.

#### **Maxaan yeelaa marka uu socdo ololaha baraarujinta cod-ridashada?**

Waa in aad hubisaa, isla markaasna aad cusbooneysaa tafaasiirtaada haddii loobahdo. Diiwaanhayuhu wuxuu hawshaas ku fududeeyaa asaga oo u dira dhamaan dadka ku yaala liiskii hore foomka cusbooneysiinta tafaasiirtada. Foomka cusbooneysiinta tafaasiirta ee lagu soo diro waxaa ku yaala tafaasiirta laga hayo markaas. Waxaa foomka ku yaala meelo banaan oo loogu talagaley inaad ku qortid sixidda haddii loo baahdo. Ka dibna saxiix iyo taariikh u yeel, dabeetana dib noogu soo dir adoo isticmaalaya bakhshadda aan foomka kuu soo raaciney. Haddii tafaasiirtaada oo dhan ay sax yihin lagaagama baahna in aad nala soo xiriitid ama aad foomka nagu soo celisid, waxaan diwaanka kuugu hayneynaa tafaasiirta aan kuu soo dirney.

## **Maxaa dhacaya haddii aanan dib idinku soo boosteyn foomka cusbooneysiinta tafaasiirta?**

Liiska ayaa laguugu haynaayaa iyadoon tafaasiirtaada sida ay ugu yaaliin foomka aan wax laga beddelin.

## **Ka warran haddii aan cinwaankeyga ka helo foom uu qof aan halkaas deganeyn leeyahay?**

Waa in aad ugu gudbisaa cinwaankooda cusub, haddii kale aad boostada ku celisid adoo ku qoraaya bakhshadda “Gone no address”. Waxaa lagu soo celineyaa Diiwaanhayaha asna qofka ayuu ka saarayaa liiska cod-ridashada.

## **Ka warran haddii aanan helin foomka cusbooneysiinta tafaasiirta?**

Waa in aad buuxbuuxisaa foomka isdiiwaangelinta oo cusub. Ka dib marka Diiwaanhayaha uu helo foomka oo dhameystiran, waxaa uu kugu qoraayaa liiska cod-ridashada halkaasoo uu magacaagu ka muuqan doono.

## ***Xadka degmooyinka doorashooyinka***

### **Ma guurin waxaase la igu qoray kursi (degmo) cusub. Waayo?**

Degmo kasta waa in ugu yaraan ay ku nool yihiin dad is tiro le’eg. Haseyeeshee degmooyinka qaarkoodna way kordhaan qaarna way yaraadaan, waxaana loo baahanyahay in xadka dib loosaxo.

5tii sanoba marka tirakoobka guud ee dadka la sameeyo (population census) waxaa dib loogu fiirsadaa xadadka degmooyinka doorashada. Haddii degmooyinka qaarkood ay dadku ku bataan, xadka ayaa dib loo habeynaayaa si degmooyinku ay uyeeshaan cadad isle’eg. Xadadka cusub ayaa dabeetana loo isticmaalaa doorashooyinka xiga.

## ***Doorashooyinka kale***

### **Waa maxay (Parliamentary by-election) doorashada baarlamaanka ee gaarka ah?**

Mararka qaarkood waxaa dhacda in kuraasta baarlamaanka qaarkood ay bannaanaadaan inta aan la gaarin doorashada guud ee baarlamaanka. Markaas waxaa dhacda in degaanka kursigu ka bannaanaadey ay fursad u helaan in ay doortaan mudane cusub. Tan waxaa la yiraahdaa (“by-election”) doorasho gaar ah. Degaanka kursigu ka bannaanaado waxaa loo cusbooneysiinayaa liiska cod-ridashada.

### **Waa maxay doorashooyinka dawladdaha hoose?**

Marka aad isu diiwaangelisid cod-ridashada doorashada baarlamaanka, waxaa islamarkaas aad isu-diiwaangelisey doorashooyinka dawladda hoose. Taas waxay ka dhigan tahay in aad cod-ridasho ka sameyn kartid doorashooyinka dawladda hoose ee degaankaaga iyo doorashada guddiga arrimaha caafimaadka. Doorashada dawladda hoose waxaa ka mid ah doorashada duqa magaaladaada ama degmadaada, mudaneyaasha wakiilada kaaga noqoneya gobolka, magaalada degmada, ururada bulshada, guddiga arrimaha caafimaadka ee degmada iyo ururada kale sida ururka bixiya shatiyada (licensing trusts).

### **Xaq ma u leeyahay inaan cod ka dhiibto aftida dawladda ama shaqsigu soo bandhigo (referendum)?**

Mar haddii aad u diiwangashantahay cod-ridashada doorashooyinka baarlamaanka, waxaad xaq u leedahay in aad ka cod-ridatid aftida ay shaqsiyaadka ama dawladdu wadato.

## ***Warar dheeraad ah***

### **Wararkan ma heli karaa iyaga oo ku qoran luqado kale?**

Haddii aad jeceshahay in aad heshid nuqulka buuggan oo ku qoran afafka kala ah Maori, Cook Islands Maori, Tongan, Samoan, Chinese, Korean ama English waxaad soo wacdaa telefoonka bilaashka ah ee 0800 ENROL NOW (0800 36 76 56) waxaana markiiba aan kuu soo direynaa nuqul.

Waad ku mahadsanatahy in aad akhrisatid buuggan haddii aad kaalmo dheerad ah u baahantahay fadlan nagala soo xiriir telefoonka bilaashka ah ee 0800 ENROL NOW (0800 36 76 56) ama waxaad booqataa bogga internetka ee [www.elections.org.nz](http://www.elections.org.nz).

Waxaan ku rajo-weynahay in aanu ka jawaabney su'aalaha aad qabtid oo dhan ee ku saabsan isu-diiwaangelinta codbixinta doorashooyinka.

Electoral Enrolment Centre  
New Zealand Post Limited  
P O Box 190  
Wellington 6015  
Phone: 0800 ENROL NOW(0800 36 76 56)  
Fax: (04) 801 0709  
email: [enrol@elections.org.nz](mailto:enrol@elections.org.nz)  
Website: [www.elections.org.nz](http://www.elections.org.nz)